جمهورية مصر العربية		٧ محرم ١٤٤١ هـ
وزارة الأوقاف		٦ سبتمبر ٢٠١٩م

مِنْ دُرُوسِ الهِجْرَةِ النَّبَوِيَّةِ: بِنَاءُ الدَّوْلَةِ

**Casharrada hijrada nabiga waxaa ka mid ah: dhisidda dowladda**

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah kaasoo oo kitaabkiisa kariimka ah ku yiri:

{ إِنَّ الَّذِينَ آمَنُوا وَالَّذِينَ هَاجَرُوا وَجَاهَدُوا فِي سَبِيلِ اللَّهِ أُولَئِكَ يَرْجُونَ رَحْمَتَ اللَّهِ وَاللَّهُ غَفُورٌ رَحِيمٌ}

**(Kuwa rumeeyay xaqa iyo kuwii hijrooday ee ku jahaaday Jidka Alle kuwaasi waxay rajayn naxariista Alle, Allana waa dambidhaafe naxariista)**

Waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago ahna midka fura oo aqoonta leh.

Waxaan qirayaa sayidkeena iyo nabigeena inuu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa, oo leh khuluqda weyn, Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa iftiinka iyo barakada leh, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

**Intaas kaddib:**

Hijrarada rasuulka Ilaahay uu kasoo hijrooday Makka Almukarama oo uu usoo hijrooday Madiina Almunawara waa dhacdo taariikhi ah oo weyn, waxay baddashay socdaalka taariikhda aadanaha, waxaan aad ugu baahan nahay inaan ka qaadano macaanida kaalin ka qaadanaya hormarka bulshada iyo dhisidda xadaarooyinkeeda, hijrada waxay ahayd kalabaxa xaqa iyo baadilka, waxayna ahayd dhisid dowlad dadka dhammaan ka dhexeeysa oo lagu dhisayo cadaalad iyo sinnaan iyo qasab la'aan iyo dhowridda qiimaha aadanaha, iyo sugidda fahanka islanoolaanshaha nabadeed iyo salka loo dhigayo islanoolaanshaha ka dhexeeya aadanaha iyo ishaysashada bulshada dadka hal dal ku nool, iyo kaalin dhaqaaleed laga geysto oo qaabab badan leh, nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - wuxuu ku dhisay dowladda tiirar iyo asaasyo waxaa ugu muhimsan:

**Dhisidda masjidka**: dhismaha masjidka wuxuu ahaa arrinka ugu horreeya oo nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - uu sameeyay markuu yimid Madiina almunawara, maxaayeelay xiriirka aadanaha uu la leeyayahay rabbigiisa waa furaha amaanka wax walba, ku dhaqanka diinta saxa ah waa waxyaalaha ugu

muhimsan oo lagu dhisayo shakhsiyadda toosan oo wax dhisaysa aan wax duminin, oo wax camiraysa oon wax kharribin, intay la egtahay ka leexashada diinta toosan ama intuu la egyahay fahanka qaldan ayaa bushiga uu galayaa dhisidda shakhsiyadda, siduu masjidka u leeyahay dhanbaalkiisa aqooneed iyo bulshadeed kaasoo ku sugaya bulshada qiyamta kaalinna ka qaadanaya adeeggeeda.

**Dhismaha dhaqaaleed**: dhaqaalaha xoogga leh wuxuu ka mid yahay tiirarka dowladda ugu muhimsan oo aan lagu dhisin waxaan isaga ahayn, dhaqaalaha xoogga leh oo sugan wuxuu u suurtagalinayaa dowladaha inay kasoo baxaan waxa laga rabo gudaha iyo dibaddaba, intaas waxaa usii dheer wuxuu u keenayaa muwaadiniinta nolol fiican, Markuu dhaqaalaha hoos u dhaco waxaa faafaya faqriga iyo jirrada, noloshana way qasmaysaa, dhibaatooyin ayaa dhacayo, akhlaaqdana way fasahaadeysaa, waxaa badanayo dambiyada, cadowgana fursad ayay u tahay, kuwaasoo ka shaqeynaya inay ridaan dowladaha oo ay galiyaan fowdo aan dhammaanaynin.

Sidaa awgeed wuxuu ku dadaalay nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - in bulshada Madiina ay ahaato bulsho awood dhaqaale leh oo u suurtagalinayso inay u fuliso dadkeeda waxay u baahan yihiin oo ay difaacdo iyo inay sugto nabadgelyada iyo amaanka iyo

camiridda koonka oo diinta islaamka la timid, wuxuu ku dadaalay rasuulka - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - suuq weyn in laga sameeyo Madiina oo uu noqdo meel wax laga helo iyo meel ganacsi iyo dadka farsamayaqaanka meel iyaga ay leeyihiin, suuqan oo uu nabigeena sameeyay waxaa lagu magacaabaa suuqa Almanaakha, Cadhaa bin Yasaar waxaa laga wariyay wuxuu yiri: (markuu doonay rasuulka Ilaahay Madiina inuu suuq u sameeyo wuxuu tagay suuqa reer Qaynuqaac kaddib wuxuu yimid suuqa Madiina wuxuu ku dhuftay lugtiisa wuxuu yiri: (**kan waaye suuqiina ee lama cirriirinayo**) Asxaabta waaweyn waxay ka qeybgaleen ganacsiyo kala duwan, ma aysan oggolaanin inay ku noolaadaan kaalmada walaalahooda Ansaar, waxaa laga wariyay Cabdiraxmaan bin Cowf -Ilaahay raalli haka noqdee - wuxuu yiri: markay Madiina soo galeen nabiga wuxuu walaaleeyay Cabdiraxmaan Bin Cowf iyo Sacad bin rabiic -Ilaahay raalli haka noqdee - wuxuu ku yiri cabdiraxmaan: aniga waxaan ahay Ansaar dadka ugu hanti badan hantiydayda labo qeybood ayaan ka dhigayaa.... wuxuu yiri: Ilaahay hakuu barakeeyo ehelkaaga iyo hantidaada aaway suuqiina?.

Maxaayeelay ummadaha aan wax haysanin oo aan soo saaranin quudkooda iyo cuntadooda iyo dharkooda iyo daawadooda iyo hubkooda arrinkooda ma hanan karaan, sidoo kale rabitaankooda iyo kalmaddooda iyo

sharaftooda iyo karaamadooda, waxay dhaheen: ixsaan u samee qofkaad doonto amiirkiisa ayaad noqonaysaa, ka kaaftoon qofkaad doonto dhiggiisa ayaad noqonaysaa, u baaho qofkaad doonto qafaalkiisa ayaad noqonaysaa, diinteena xaniifka ah waxay na bartay in gacanta sare ay ka khayr badan tahay gacanta hooseysa wuxuu leeyahay nabigeena:

**(اليدُ العُليا خَيْرٌ مِنَ اليَدِ السُّفْلى)**

(**Gacanta sarreysa waxay ka khayr badan tahay gacanta hooseysa**), wuxuu leeyahay:

**(اليَدُ المُعطِيةُ هي العُليَا ، والسَّائِلةُ هي السُّفلَى)**

(**Gacanta wax bixinayso ayaa sarreysa, tan wax weyddiinayso ayaa hooseysa**)

Waxaan shaki ku jirin arrinkan inuu ku dabaqmayo dowladaha iyo mu'sasooyinka iyo qoysaska iyo dadka oo dhan, qof inkiriyo ma jiro hantida muhimadda ay u leedahay arrimaha nolosha iyo horumarinta dadka iyo ummadaha si loo xaqiijiyo nolosha wanaagsan iyo fuuliadda jaranjarada hormarka amiirka shucarada run buu sheegay markuu yiri:

**بِالعلمِ والمَالِ يَبْنِي الناسُ ملكَهمُ * لم يُبنَ ملكٌ عَلى جَهلٍ وإقلالِ**

**Aqoon iyo hanti ayay dadka ku dhisaan xugunkooda ***
**Xugun laguma dhisin jaahilnimo iyo saboolnimo**

Nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - wuxuu u dejiyay qaacidooyin nidaaminaya ganacsiga qaabka uu ku soconayo, wuxuu ku boorriyay dabacsanaan iyo ficanaanta nafta waqtiga iibinta ama iibsashada wuxuu yiri:

**(رَحِمَ اللَّهُ رَجُلًا سَمْحًا إِذَا بَاعَ ، وَإِذَا اشْتَرَى ، وَإِذَا اقْتَضَى)**

(**Ilaahay ha u naxariisto qofka dabacsan markuu wax iibinayo iyo markuu wax iibsanayo iyo markuu wax gudanayo**), Wuxuu amray runta iyo amaanada wuxuu yiri:

**(التَّاجِرُ الصَّدُوقُ الأَمِينُ مَعَ النَّبِيِّينَ وَالصِّدِّيقِينَ وَالشُّهَدَاءِ)**

(**Ganacsadaha runlowga ah oo amaanada leh wuxuu la jirayaa anbiyada iyo siddiiqiinta iyo shuhadada**), Wuxuu xarrimay ixtikaarka wuxuu yiri:

**(مَنِ احْتَكَرَ طَعَامًا أَرْبَعِينَ لَيْلَةً فَقَدْ بَرِئَ مِنَ اللَّهِ تَعَالَى ، وَبَرِئَ اللَّهُ تَعَالَى مِنْهُ)**

(**Qofkii celiyo cunto (aan qofna ka iibinin) afartan habeen wuxuu bari ka noqday Alle, Ilaahayna wuxuu bari ka noqday isaga**)

Wuxuu soo mari jiray isaga laftiisa suuqa wuxuu la socon jiray ganacsiga qaabkuu ku socdo wuxuu dadka ku hagi jiray wixii wanaaggooda ku jiro

فعَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ (رضي الله عنه) أَنَّ رَسُولَ اللَّهِ (صلى الله عليه وسلم) مَرَّ عَلَى صُبْرَةٍ مِنْ طَعَامٍ ، فَأَدْخَلَ يَدَهُ فِيهَا ، فَنَالَتْ أَصَابِعُهُ بَلَلًا ، فَقَالَ (صلى الله عليه وسلم) : (يَا صَاحِبَ الطَّعَامِ ، مَا هَذَا؟) ، قَالَ : أَصَابَتْهُ السَّمَاءُ يَا رَسُولَ اللَّهِ ، قَالَ (صلى الله عليه وسلم) : (أَفَلاَ جَعَلْتَهُ فَوْقَ الطَّعَامِ حَتَّى يَرَاهُ النَّاسُ) ، ثُمَّ قَالَ (صلى الله عليه وسلم) : (مَنْ غَشَّ فَلَيْسَ مِنَّا) .

Waxaa laga wariyay Abuu Hureyra -Ilaahay raalli haka noqdee - in rasuulka - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - soo maray goob cunto wuxuu galiyay gacantiisa waxaa farahiisa soo gaaray qoyaan, wuxuu yiri: (**qofka cuntada lahow muxuu yahay kan?**) wuxuu yiri: roob ayaa gaaray rasuulkii allow, wuxuu yiri: (**maad soo saarto cuntada korkeeda si dadka ay u arkaan**) kaddib wuxuu yiri: (**qofka na siro naga mid ma aha**)

**Heshiiska Madiina:** nabigeena wuxuu dhisay dowlad xoog badan hijrada kaddib, tiirarkeedana wuxuu ku sugay heshiiska Madiina, kuma kaaftoomin nabiga inuu walaaleeyo Muhaajiriinta iyo Ansaarta iyagoo khilaafyo iyo loollamo ka dhexeeyay, wuxuu u gudbay macne inaasaani ah markuu sameynayay "heshiiska Madiina" kaasoo lagu tiriyo heshiiska aadanaha ugu weyn taariikhda dadka, wuxuu sugay xuquuqda iyo

waajibaadka dhammaan dadka bulshada ku nool, wuxuu salka u dhigay islanoolaanshaha nabadeed oo ka dhexeeya dadka hal dal kuwada nool, taasoo dhinac ah tan insaaniyaddana dhinaca kale ah, taasoo ka dhegaysa heshiiska ugu weyn ee dadka xagga fiqiga islanoolaanshaha taariikhda marka loo noqdo, taas waxaa daliil u ah: heshiiska uu la galay rasuulka Alle Yahuudda Madiina iyo dadka kale, wuxuu siiyay Yahuudda dhammaan xuquuqda muslimiinta xagga amaanka iyo nabadgalyada iyo xoriyadda iyo difaaca dadka kawada dhexeeya, qodobada ugu muhimsan waxaa ku jiray: (Yahuudda waxay la bixinayaan mu'miniinta maadaama ay yihiin kuwa dagaallamo, Yahuudda banii Cowf waa dad la jiro mu'miniinta, Yahuudda waxay leeyiihiin diintooda muslimiintana waxay leeyihiin diintooda, mawaalidooda iyo naftoodaba, qofkii dulmi iyo dambi sameeyo mooyee), Waxaa kusoo arooray in diintooda ay xor u yihiin iyo amaanka iyo Madiina in cadowga si wadajir ah looga difaaco, Tan waxaa laga wadaa dowladda xagga islaamka inay deeqeyso dhammaan muslin iyo dad aan muslin ahayn, waxaa u sugan waxa noo sugan, waxaa laga rabaa wixii laynaga rabo, waxaana shardi u ah in la qaato shuruudda bulshadeed oo u ilaalinayso dadka dhamaan xuquuqdooda iyo waajibaadkooda, waxaana ugu horreeya: nabad iyo inaan qof lagu xadgudbin waa

inaan la burinin heshiiska bulshada (Dastuurka) kaasoo dadka oo dhan xiriirkooda nidaaminaya, dadka inay nabadgelyo iskula noolaadaan waa wax diinta ay amartay, waa baahi bulshadeed oo waaqaca uu keenayo oo qofka ku nool yahay, taasna ma suurtagalayso marka ay dhammaan dareemaan inay hal dal ay ka tirasan yihiin mooyee, oo ay ka siman yihiin xuquuqda iyo waajibaadka, iyagoon lagu kala saareynin iyagoo loo eegayo waxa ay ku sugan yihiin ama ay yihiin, wuxuu yiri Alle:

{لَا إِكْرَاهَ فِي الدِّينِ قَدْ تَبَيَّنَ الرُّشْدُ مِنَ الْغَيِّ}

(**Qasab ma aha diinta galiddeedu, hanuunkii waa ka cadaaday baadida**)

Nabiga iyo asxaabtiisa waxay dabaqeen asaaskan dabaqid camali ah, qof ma ayna ku qasbin inuu diintan soo galo, qof ma aysan ka duminin kaniisad iwm. meelaha ay gaalada ku cibaadeystaan maysan ku xadgudbi jirin muslimiinta, maxaayeelay islaamka dadka kuma qasbo in la rumeeyo, qof baddali karo ma jiro khilaafkan iyo kala duwanaantan, taas waxay khilaafsan tahay iraadada Alle, wuxuu yiri Alle:

{وَلَوْ شَاءَ رَبُّكَ لَآمَنَ مَنْ فِي الْأَرْضِ كُلُّهُمْ جَمِيعًا أَفَأَنْتَ تُكْرِهُ النَّاسَ حَتَّى يَكُونُوا مُؤْمِنِينَ}

(**Hadduu doono rabbigaaga waxaa rumayn lahaa dadka dhulka ku sugan oo dhan, ee ma adaa dadka ku qasbi ilaa ay ka rumeeyaan**)

in loo daayo qofka wuxuu aaminsan yahay iyo in la tixgaliyo xuquuqda iyo waajibaadka waa tiir muhim u ah dhisidda dowladda, wuxuu ku leeyahay saameyn xiriirka ka dhexeeya ummadaha iyo bulshadaha, cid kaste waxay aaminsan yihiin caqiido, waxay u arkaan inay tahay midda ugu fiican caqiidadooda, islaamka wuxuu naga reebay inaan ku xadgudubno ama aan caayno dadka diimaha kale haysto, maxaayeelay diinta Alle wuxuu usoo dejiyay in dadka ay sacaado helaan, wuxuu yiri Alle:

**{ وَلَا تَسُبُّوا الَّذِينَ يَدْعُونَ مِنْ دُونِ اللَّهِ فَيَسُبُّوا اللَّهَ عَدْوًا بِغَيْرِ عِلْمٍ كَذَلِكَ زَيَّنَّا لِكُلِّ أُمَّةٍ عَمَلَهُمْ ثُمَّ إِلَى رَبِّهِمْ مَرْجِعُهُمْ فَيُنَبِّئُهُمْ بِمَا كَانُوا يَعْمَلُونَ}**

(**Ha caayin waxay caabudi oo Alle ka soo haray oo markaas iyana caayaan Alle colnimo iyo cilmi la'aan, saasaan ugu qurxinay ummad kaste camalkooda xagga Alle uunbayna noqoshadoodu tahay wuxuuna uga warrami waxay fali Jireen**)

Sidoo kale islaamka wuxuu ku abuuray dadka isaga raacsan samafalka iyo deriswanaagga lala yeeshto dadka aan muslinka ahayn, waxaa soo aroortay nusuus sugaysa

asaaskan oo caddeynaysa qaababka bulshada islaamka loogu dabaqo, wuxuu yiri Alle:

**{لَا يَنْهَاكُمُ اللَّهُ عَنِ الَّذِينَ لَمْ يُقَاتِلُوكُمْ فِي الدِّينِ وَلَمْ يُخْرِجُوكُمْ مِنْ دِيَارِكُمْ أَنْ تَبَرُّوهُمْ وَتُقْسِطُوا إِلَيْهِمْ إِنَّ اللَّهَ يُحِبُّ الْمُقْسِطِينَ}**

(**Alle kama reebayo kuwa xaqa rumeeyay inay wanaag iyo caddaalad u falaan kuwa aan diinta kula dagaallamin guryahoodana ka bixinin, maxaa yeelay Alle waa jecel yahay kuwa caadiliinta**).

Islaamka wuxuu amray dadka isaga raacsan inay ilaaliyaan la dhaqanka dadka aan muslinka ahayn marka ay la doodayaan, wuxuu ku boorriyay in doodda ay wanaag ku saleysnaato wuxuu yiri Alle:

**{وَلَا تُجَادِلُوا أَهْلَ الْكِتَابِ إِلَّا بِالَّتِي هِيَ أَحْسَنُ إِلَّا الَّذِينَ ظَلَمُوا مِنْهُمْ وَقُولُوا آمَنَّا بِالَّذِي أُنْزِلَ إِلَيْنَا وَأُنْزِلَ إِلَيْكُمْ وَإِلَهُنَا وَإِلَهُكُمْ وَاحِدٌ وَنَحْنُ لَهُ مُسْلِمُونَ} .**

(**Ha kula murmina ahlu Kitaabka wax fiican mooyee, marka laga reebo kuwa dulmiga fala oo ka mid ah, dhaha waxaan rumeynay wixii nalagu soo dajiyay iyo wixii laydinku soo dajiyay Ilaaheenna iyo ilaahiinna waa mid annaguna isagaan u hoggaansan nahay**)

Heshiiska Madiina waa tusaale lagu dayan karo si loo ilaalin lahaa karaamada aadanaha, kaaso ka shaqeynaya

dadka inuu isu keeno si dowlad loo dhiso iyo xadaaro dadkana wax loo qabto.

**Waxaan oranayaa oraahdayda oo tan ah, Ilaahay ayaan dambidhaaf u weydiinayaa nafteyda iyo idinka**

***

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah Waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa sayidkeena iyo nabigeena Muxamed inuu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa, Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa dhammaan ilaa maalinta abaalmarinta.

**Walaalaha islaamka ahow:**

Wadanka wuxuu leeyahay qiime sare iyo darajo korreysa in la jeclaado iyo in la sheegto oo la difaaco waa wax fidro nafta aadanaha fayow ku abuuran, waa wax dusha kaa saaran oo lagaa rabo, diintana sidaas ayaya adkeeysay, nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - tusaalaha ugu weyn uyuu sameeyay oo ah dhulkaaga inaad jeclaato iyo inaad

sheegato, wuxuu yiri rasuulka marka uu hijroonayay asoo la hadlaya dalkiisa Makka almukarrama:

(مَا أَطْيَبَكِ مِنْ بَلْدَةٍ وَأَحَبَّكِ إِلَيَّ ، وَلَوْلا أَنَّ قَوْمَكِ أَخْرَجُونِي مَا خَرَجْتُ)

(**Maxaa kaa fiican dal ahaan oo xaggayga loogu jecel badan yahay, haddii dadkaaga aan isoo saari lahayn ma aanan soo baxeen**), Markuu usoo hijrooday Madiina almunawara oo uu degay wuxuu baryay Alle inuu jeclaysiiyo dalkiisa labaad, inuu nabad iyo xasillooni siiyo wuxuu yiri:

(اللَّهُمَّ حَبِّبْ إِلَيْنَا المَدِينَةَ كَحُبِّنَا مَكَّةَ أَوْ أَشَدَّ)

(**Ilaahayow na jeclaysii Madiina saan u jecel nahay Makka ama si ka daran**)

Xiriirka ka dhexeeya diinta iyo dowladda waa xiriir is dhammaystir ah ee ma aha xiriir iska soo horjeeda, ilaalinta dalalka waxay ka mid tahay ujeeddooyinka daruuriga ah oo ay habboon tahay in la dhowro, dhaqaale deggan lama helayo haddaan la helin dal leh nabadgelyo iyo xasillooni, dalka in la difaaco oo la dhowro dartiisa wax loo huro waa ujeeddo sharci ah qof kaste ayaa waajib ka saaran oo ku nool dhulkiisa oo harsanaya cirkiisa, jacaylka dalka kuma eka caadifadda iyo dareenka kaliya, waa inuu noqdaa fal iyo dhaqan ay sameynayaan dadka iyo bulshada, waxaa lagama

maarmaan ah inuu sii jiro asoo ah mid xoog leh oo sharaf leh.

Wadaninimada dhabta ah ma aha hadallo kor loo qaadayo ama ereyo lagu celcelinayo, wadaninimada waa rumaysanaan iyo dhaqan iyo hurid, wadaninimada waa nidaam nololeed iyo dareen la dareemayo dhaqaaqa dalka iyo waxyaalaha soo waajahaya iyo inaad u damqato dhibka soo gaaraya, inaad ku faraxdo xaqiijinta yiddidiiladiisa, inaad diyaar u ahaato wax inaad u harto dartiisa, waxaa tahniyad mudan ragga ka dhabeeyay waxa ay Ilaahay kula ballameen oo naftooda u huray Ilaaahay dartiisa iyagoo difaacaya dalkooda korna u qaadaya baladkooda.

**Ilaahayow ka ilaali Masar iyo dalalka kale ee islaamka iyo dadkooda iyo ciidankooda iyo nabadsugiddooda wax kaste xun, kana celi dhagarta kuwa dhagra iyo cuqdada kuwa cuqdadaysan iyo xaasidnimada kuwa wax xasda**